

In lagu safro gaadiidka Maamul gobaleedka Kronoberg – bas iyo tareen.



Wax fiican in la ogaado

Gaariga carruurta lagu qaado

Haddii uu boos jiro gaariga carruurta lagu qaado si lacag la'aan ah ayaa loo wadan karaa. Gaariga carruurta lagu qaado oo loo wato si aan ahayn in carruur lagu sido waxaa laga bixinayaa lacag la mid ah tan carruurta/dhallinyarada laga bixiyo.

Baaskiil

Haddii uu boos jiro halkii musaafirba wuxuu Baska iyo Tareenka gobalka la raaci karaa hal baaskiil oo laba lugoodle ah oo caadi ah. Lacagta laga dhiibayo baaskiilku waxay la mid tahay tan carruurta/dhallinyarada laga dhiibo.

Koontarool/lacagta khidmada ah oo dheeraad ah

Haddii marka la koontaroolayo uusan qofku heysan ama uu heysto caddeyn safar oo khaldan wuxuu dhiibayaa 1000 kr oo lacag khidmo oo dheeraada ah.

Xayawaanno la wato

Ey, mukulaal ama xayawaan guri oo yar si lacag la'aan ah ayaa loo wadan karaa, iyadoo aysanna dhibaato musaafiriinta kale ku noqoneyn. Xayawaanku waa in uu inta safarka lagu jiro xiranaadaa ama uu dhex fadhiyaa boorso ama shabaq.

Xayawaanno lama dhigi karo boosas la fadhiisto.

Bagaashka gacanta

Si lacag la'aan ah ayaad u wadan kartaa bagaash gacanta ah oo aad qaadi kartid. Maaha sidoo kale in uu xiro meelaha laga baxo ama in la dhigo meelaha lagu fadhiisto.

Sigaar cabid

Waa mamnuuc in sigaar lagu cabo baska, tareenka, hoolalka wax lagu sugo ama meelaha cimilada laga galo, taasi wey khuseysaa xitaa sigaarka elekteroonigga ah.

Meelaha lagu iibiyo ee ugu horreeya

- Alvesta – Pressbyrån
- Hovmantorp- Järnvägscaféet
- Lessebo – COOP
- Lenhovda – COOP
- Ljungby – Willys
- Markaryd – COOP
- Tingsryd – Börjes
- Växjö – Länstrafiken Kronobergs Kundcenter, Pressbyråerna, COOP Dalbo, ICA Maxi Grand Samarkand
- Åseda – COOP
- Älmhult – Sydresor

Mashiinnada tikidhadu waxay ku yaallaan dhammaan maxaddooyinka tareennada ee maamul gobaleedka.

Qiimaha safarka hal mar oo kr bus iyo tareen



Tirada aaga	Qiimaha caadiga safarka hal mar			Kaadhka lacagta safarka baska iyo tareenka		
	Carruurta/dhalinyarta 0-19 sanno	Qof weyn laga bilaabo 20 sanno	Labo/Qoys	Carruurta/dhalinyarta 0-19 sanno	Qof weyn laga bilaabo 20 sanno	Labo/Qoys
1	16	27	47	12,80	21,60	39,20
2	22	37	67	17,60	29,60	53,60
3	29	49	88	23,20	39,20	70,40
4	37	61	110	29,60	48,80	88,00
5	44	73	131	35,20	58,40	104,80
6	51	85	153	40,80	68,00	122,40
7	59	99	178	47,20	79,20	142,40
8	69	115	207	55,20	92,00	165,60
9	75	125	225	60,00	100,00	180,00
10	82	137	247	65,60	109,60	197,60
11	89	149	268	71,20	119,20	214,40
12+	99	165	297	79,20	132,00	237,60

Macluumaad xiriir:

Xoghayn 0470-0470-58 32 80

Xarun macaamiil 0771-76 70 76

kundcenter@lanstrafikenkron.se

Gobal Kronoberg

Länstrafiken Kronoberg

351 88 Växjö

Caddeymo safar oo kala duduwan

Tikid sii socod ama soo socod ah – lacag kaash ah – Kaarka safarka qasnad safar

Loogu tala galay adigaaga safraya safarro mid-mid ah ama meelaha aad u safreysid ay kala duduwanyihiin.

Waqtiga kaarka safarka - dad waaweyn - carruur/dhallinyaro - qof wax dhigta

Si xur ah ayaad muddo 30 maalmood ah ugu safreysaa masaafo u dhexeysa laba meelood oo aad adigu go'aamineysid.

Nuucyada tikidhada/Xadka da’da

Qof weyn waxaa qofka loo arkaa laga billaabo 20 sano jir, markaas oo uu sicirka caadiga ahi shaqeynayo.

Carruur/dhallinyaro ilaa iyo 19 sano jirku waxay helayaan raqiisin 40% ah ku aaddan sicirka caadiga ah ee tikidka dadka waaweyn.

Carruurta 0-6 sano jirku si lacag la’aan ah ayey qof weyn oo lacag bixiyaha ah ula safrayaan (ugu badnaan labo carruur ah halki qof ee weyn ee lacag bixiyayba). Qof lacag tikid oo qof weyn bixiyay ahaan waxaa qofka loo arkaa marka uu heysto tikid sii socod ama soo socod ah, Kaar safar oo waqti dad waaweyn ah iyo Kaar safar oo waqti arday ah. Carruur aan la socon qof weyn oo lacag bixiyay waxay dhiibayaan lacag carruureed/dhallinyaro.

Tikidka Duo/Qoys

Tikidka Duo/Qoys si raqiis ah ayaad ugu safreysaan.

Tikidku wuxuu u shaqeynayaa ilaa iyo shan qofood, oo ay ugu badnaan labo noqon karaan dad waaweyn. Qiimuhu waxay 10 % ka yaryihiin laba tikid oo dad waaweyn ah.

Qof weyn ahaan waxaa loo aqoonsanyahay dhammaan dadka buuxiyeen 20 sano.

Duo/Qoys waxay xitaa ku dhiibi karaan qasnad safar, taasoo siineysa raqiisin dheeraad ah oo 20 % ah.

Duo/Qoys wuxuu horbaba faa’iido yahay marka aad safreysaan adinkoo ah laba qof oo waaweyn.

Musaafiriintu waxay kooxda da’da ka gudbayaan maalinta ay buuxinayaan 7 ama 20 sano jir. Haddii da’da laga shakisanyahay waa in kaarka aqoonsiga leys tusaa haddii kale waxaa leyska qaadayaa qiimaha da’da sarreysa ee ugu dhaw.

Tikid sii socod ama soo socod ah

Tikid sii socod ama soo socod ah waxaa loogu tala galay adigaaga aan si joogto ah u safrin ama meelaha aad u socotid ay kala duduwanyihiin.

Qiimaha tikidka sii socodka ama soo socodka waxaa xukuma tirada soonanka aad ku safreysid iyo da’da musaafirka. Xagga safarka gaadiidka magaalada Växjö gudeheeda waxaa shaqeynaya qiimaha soonka 1.

Kaarka safarka qasnadda safarka iyo waqtiga

Kaar safar

Kaarka safarku waa mid aan shakhsi ahayn, marka aadan adigu isticmaaleyn waad deymin kartaa saaxiib ama qof qoyska ka mid ah. Kaarka safarku waa caddeyntaada socdaalka waana in la wataa inta safarka lagu jiro oo dhan. Waxaad Kaarka safarka ku shuban kartaa xilli ama qasnad safar ama labadaba.

Qasnadda safarka

Qasnadda safarka waxaad ku shubaneysaa lacagti aad doontid, laakiin caddad 100 buuxda ah. Marka aad qasnadda safarka ku bixisid lacagta tikidkaaga sii socodka ama soo socodka ah waxaad heleysaa 20 % oo ah raqiisin ku aaddan qiimaha caadiga ah ee safarka.

Waqtiga kaarka safarka 30 maalmood

- loogu tala galay adigaaga sida joogtada ah u safraya!

Waqtiga kaarka safarku wuxuu si aan xad lahayn 30 maalmood uga shaqeynayaa masaafo horay loo doortay. Kaarkaas isaga ah adiga ayaa go’aaminaya masaafada aad dooneysid in aad kula safartid. Haddii aad horay iyo gadaal ugu safartid masaafo dhaafeysa xudduudaha maamul gobaleedka waxaa kuu faa’iido badan in aad isticmaashid Kaarka waqtiga safarka. Adiga ayaa go’aaminaya xitaa haddii aad dooneysid in bas raacdid ama bas iyo tareen labadaba.

Kaarka safarka oo uu waqti ku jiro wuxuu shaqeynayaa oo keliya waqtigi la hawl geliyay. Waqti waxaa lagu hawl gelin karaan baska dushiisa, meelaha aannu leennahay ee wax lagu iibiyo iyo mashiinnada tikidhada ee ku yaalla maxaddada tareenka.

Adigaaga ah carruur/dhallinyaro 0-19 jir

– waxaad iibsan kartaa Kaar waqti safar oo leh raqiisin 25 % ah.

Marka lagu safrayo waqtiga carruurta/dhallinyarada waa in la is tusaa aqoonsi shaqeynaya oo da’da adkeynaya.

Adigaaga wax dhigta

– waxaannu Kaarka waqtiga safarka kugu siineynaa raqiisin 25 % ah.

Kaarka Waqtiga safarka ee Ardaygu wuxuu u shaqeynayaa qofka heysta Kaarka Mecenat- ama Kaar arday oo leh calaamadda safarka ardayda (sawir ku kordhi - si gooni ah ayaa leysugu soo dirayaa)

Dib u iibsasho

Adigaaga musaafirka ah ayaa mas’uul ka ah Kaarkii safar ee luma ama jajaba. Dhaawacyo ku yimid khalad farsamo awgood waxaa si lacag la’aan ah loogu beddelayaa Xarumaheenna macaamiisha ama xogheynteenna.

Tikidka kaashka ah iyo qasnadda safarka waxba lagama qabanayo.

Kaarka safarka ee leh waqti sugaya waxaa wax looga qabanayaa Xarumaheenna macaamiisha iyadoo la bixinayo 50 kr oo khidmada xafiiska qaabilaadda ah.

Zoon beddelasho ama kaar qaali ah u beddelasho waa lagu sameyn karaa xilli sugitaan iyadoo aan khidmada xafiiska qaabilaadda la bixin

Kaar qaali ah u beddelasho waa lagu sameyn karaa waqti shaqeynaya, laakiinse waqtiga uu shaqeynayo lama beddelayo.

<i>Kaar safar oo leh waqti shaqeynaya waxaa wax looga qabanayaa si waafaqsan jadwalka hoos ku qoran:</i>	
--	--

Maalinta uu shaqeynaayo	Dib u bixin % qiimaha kaadhka
1	80 %
2	60 %
3	50 %
4	40 %
5	30 %
6	20 %
7	10 %

Safarro lacag la’aan ah sii socod iyo soo socodba oo rugta daryeelka caafimaadka ah

Bas ku safar

Si lacag la’aan ah ayaad gaadiid ugu raaci kartaa rugaha daryeelka caafimaadka ee maamul gobaleedka gudihiisa ah haddii aad u yeeritaankaaga darawalka tustid, ama xagga hey’adaha caafimaadka haddii aad tustid rasiidki daryeel bixiyaha. Haddii aadan u yeeritaan heysan ama aadan dooneynin in aad tustid, waxaad bixineysaa kaash, waxaadna tikidka iyo rasiidka daryeel bixiyaha u direysaa Region Kronoberg, Serviceresor, 351 88 Växjö. Gobalka Kronoberg wuxuu megayaa oo keliya kharashka rasmiga ah ee safarka baska, macnaha lacagta lagu bixiyay kaarka lacag dhiibidda ama khasnadda safarka. Haddii aad tikid sii socod ama socod ah kaash uga iibsatid baska dushiisa ma megayo lacagta kaashka ah ee 20 kr ah ee gaadiidka gobalku uu dulsaarto.

Tareen ku safrid

Haddii aad dooratid in aad tareen ku tagtid rugaha caafimaadka waa in aad tikid iibsataa inta aadan safrin. Si aad megdhaw ugu heshid tikidkaaga waxaad rasiidka daryeel bixiyaha si wadajir ah tikidka ula soo direysaa: Region Kronoberg, Serviceresor, 351 88 Växjö.

Sidan ayaad safarkaaga buska ugu bixineysaa

- Kaar safar, oo waqti lagu shubay iyo/ama qasnad safar

- Kaar lacag bixin. Dhammaan basaska gaadiidka Maamul gobaleedka Kronoberg waxaa jira meelo kaar lacag bixineed. Waxaa ku shaqeynaya MasterCard iyo VISA.

- Tikidka taleefanka gacanta. libso adiga oo isticmaalaya app-keenna Länstrafiken Kronoberg. Marka ugu horreysa ee aad iibsaneysid tikid taleefan gacanta ah waxaad u baahantahay in aad diiwaan gelisid kaarka lacag bixinta, MasterCard ama VISA, ama adeegga qaan sheegadka Klarna. Waxaad taleefanka gacanta toos ugula qabaneysaa dhowr hawlood. Tikidkaaga taleefanka waxaad iibsan kartaa ugu horreyn 20 daqiiqo dhaqaaqidda ka hor. Tikidka waa in aad iibsataa inta aadan baska raacin.

- Xagga kaash ku dhiibidda baska dushiisa ah. Dhammaan kaash wax ku bixinta baska dushiisa ah waxaa lagu darayaa 20 kr. Wax dheeraad ah kuma kordhayaan haddii lacagta lagu bixinayo kaar, tikid taleefan gacan ama Kaar safar

- Waxaad xitaa tikid ka iibsan kartaa Xarumaheenna macaamiisha ama meelaheenna wax lagu iibiyo ee la xiriira safarkaaga.

Sidan ayaad u bixineysaa lacagta safarkaaga tareenka ee tareenka Öresund ama tareenka Krösa

- Kaarka safarka oo waqti safar oo shaqeynaya lagu shubay.

- Kaarka safarka oo qasnad safar lagu shubay. Safarka ka hor iibso tikidkaaga. Waxaad tikidka ka iibsan kartaa Xarumaheenna macaamiisha, iyo meelaheenna wax iibinta ee la xiriirta safarkaaga.

- Mashiinnada tikidhada ee meesha tareennada laga raaco. Safarka ka hor iibso tikidkaaga. Waxaad xitaa ku dhiibi kartaa Kaarka safarka qasnadda safarka ama kaararka lacag bixinta (VISA/MasterCard/ Diners/American Express).

Bogaggeygu wax dheeraad ah ayuu ku siinayaa

Bogaggeygu waa adeeg boggeenna intarneetka ah oo lacag la’aan ah halkaas oo aad fursad u heleysid waxyaabo fiiciican oo laguugu casuumayo iyo adeegyo wanwanaagsan. Waxaad u baahantahay toban nambar oo swiidhish ah. Mar kasta oo aad iibsatid ama Kaar safar ku soo degsatid Bogaggeyga waxaad heleysaa 10 % oo raqiisin ah ama 10 % oo qiimo dheeraada ah. Diiwaan geli Kaarkaaga safarka, ee hel damaanad qaad xagga lumidda ku aaddan.

FG! Haddii aad Bogaggeyga ku soo degsatid Kaarka safarka, aadna tareen ku safreysid, hubi in aad buuxis sugid ku hawl gelisid mashiinka tikidhada.

Wax dheeraad ah ka akhriso www.lanstrafikenkron.se

App-ka safarka

App-keenna safarka ee Länstrafiken Kronoberg waxaad ka iibsan kartaa tikid taleefan gacan ah, waxaad ka raadsan kartaa safar, waxaad ka arki kartaa busteejo iyo khariidad bas, waxaadna ka raadsan kartaa waqtiyada busteejooyinka laga baxayo. Ku soo degso App Store ama Play Butik.